**IIB MA GALO**

# FAAFIN RASMIAH
# الجريدة الرسمية

**EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA**

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad | Muqdisho, 20 Disembar 1975 | L. 3 R. 12

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Colaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda – dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I

## W. M.

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Nofembar 1975, L. 172 — *Billad Maar ah ee Hawlkarnimo oo lagu maamuusay 66 qof oo ka mid ah Ciidankii Gargaarka Abaarta.* Bog. 1061

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Nofembar 1975, L. 173 — *Billad lacag ah ee Hawlkarnimo.* » 1064

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Nofembar 1975, L. 174 — *Billad Maar ah ooHawlkarnimo: Gobolka Banaadir.* » 1065

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 27 Oktoobar 1975, L. 175 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyey (concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Dr. Xasan Warsame Cayli — ku yaal Muqdisho Xaafadda Hodan — kuna fadhiya mq. 243.* » 1066

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 27 Oktoobar 1975, L. 176 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyey (concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Xasan Warsame Cali — ku yaal Muqdisho, kuna fadhiya mq. 202,50, Cad dhul Dowladeed la siiyay Jaalle Nuur Muddey Cali, ku yaal Muqdisho kuna fadhiya mq. 202,50.* » 1067

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 27 Oktoobar 1975, L. 177 — *Heerka Sarrifka lacagaha Qalaad.* Bog. 1060

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 6 Disembar 1975, L. 178 — *Heerka Sarrifka lacagta Qaalad.* » 1070

---

## TALOOYIN ISGARSIIN OEGYSIIS *W*IXII LA MID AH

## BOOGA SEDDEXAAD

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 1 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Maxamed Xareed Maxamed. (294)* Bog. 1072

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 2 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Cabdi Daahir Yuusuf. (295)* » 1073

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Abril 1975 — *Naada Dhul Jaalle Aadan Xaaji Nuur. (296)* » 1074

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Cali Deble Huseen. (297)* » 1075

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Axmed Muddey. (298)* » 1076

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Xasan Nuur Xasan. (299)* » 1077

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Sheekh Aadan Xirsi. (300)* » 1078

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Maxamed Abiikar Sheekh. (301)* » 1079

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Disembar 1975 — *Naada Dhul Jaalle Iisha Sheekh Cali. (302)* » 1080

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, 20 Nofembar 1975, — *Lumid Libretto L. 2065, So. Sh. 170, u Jaalle Nuur Sahal Cabdi. (303)* » 1081

# BOGGA LABAAD

**XEER L. 172 ee 30 Nofembar 1975.**

**Billad Maar ee Hawlkarnimo oo lagu maamuusay 66 qof oo ka mid ah Ciidankii Gargaarka Abaarta.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida habsamida iyo hawlkarnimada dheeraadka ah leh oo Jaallayaasha hoos ku magacaaban ay u hirgeliyeen hawlihii adkaa ee gargaarka baarta ilagoo si daacadnimo iyo niyadsami buuxda leh ku gutay xilkii ka saarraa hawlahaas fulintooda;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan iney tahay si gaar ah in loo maamuuso Jaallaayaasha iyaga ah ee kaalinta wan:gsan ka geystay gurmadkii ummadda ee grgaarka abaarta;

MARKUU DHEGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad ah oo hawlkarnimo Jaallayaasha:

1. Xirsi Cabdullc Xirsi — W. A. Gudaha, Xoghaynta Gargaarka Abaarta.

2. Dr. Saciid **Xaaji Maxamuud** — W. A. Gudaha, Xoghaynta Gargaarka Abaarta.

3. Safiya Maxamed Cabdille — W. A. Gudaha, Xoghaynta Gargaarka Abaarta.

4. G.le Sare **Yuusuf Axmed** Salxaan — G. W. Galbeed, Tal Xoogga Q.ta W. Galbeed.

5. G.le **Cabdullahi Xaaji Cali** — G. W. Galbeed, Gudd. Degmada Berbera.

6. Maxamed Ciise Salwe — G. W. Galbeed, X. G.
7. Yuusuf Cacallim Ibrahim — G. W. Galbeed Wak. Degmada Gobolka.

8. G.le Dhexe Jaamac Xirsi — G. Togdheer, Guddoomiyaha Gobolka.
9. Dh.me Maxamed Cabdi Geelle — G. Togdheer, Qaybta Booliska. Gobolka.
10. Dh.me Dr. Maxamed Cali Yuusuf — G. Togdher, Qaybta Xoogga Gobolka.
11. Dr. Cabdi Axmed Faarax — G. Togdher, Wasaaradda Caafimaadka.
12. Dh.me Dr. Cawil Cabdiraxman Cali — G. Togdhe r,Xoogga Dalka Qaybta Caafimaadka.
13. Dhamme Dr. Saciid Maxamed Samantar — G. Togdher, Xoogga Burco.
14. Dhamme Dr. Cabdi Caydiid Xiirey — G. Togdheer, Xoogga Burco.
15. Dhamme Dr. Cumar Sheekh Xasan — G. Togdheer, Xoogga Burco.
16. G.le Dhexe Geedi Qayaad — G. Togdheer, Maam. X. Beer Xoogga.
17. Dhamme Takh. Cismaan X. Macow — G. Togdheer, Takh Xoogga Buuhoodle.
18. Dhamme Maxamed Cabdi Ibraahim — G. Togdheer, Xogga Buuhoodle.
19. G.le Dhexe Maxamed Aadan Guuleed — G. Togdheer, Xoogga Buuhoodle.
20. Dhamme Maxamuud Ibraahim Maxamed — G. Togdheer, Xoogga Buuhoodle.
21. Aamina Maxamed Muddey — G. Sannaag, Sh. Qaranka Ceelafwey.
22. Axmad Calasow Maxamed — G. Sannaag, B. Cas Ceelafwey.
23. Saamiya Sheekh Naadir — G. Sanaag, B. Cas Ceelafwey.
24. Dr. Yuusuf Maxamed Cali — G. Sannaag, Caafimaadka Badhan.
25. Cali Cabdulle Maxamed Qaawane — G. Sanaag, Sh. Qaranka Badhan.
26. G.le Ibraahim Maxamed Cashuur — G. Bari, Gudd. Gobolka Bosaaso.
27. Maxamed Cumar Asad — G. Bari, Gudd. Gobolka Bosaaso.
28. Sahra Maxamed Jibriil — G. Bari, Sh. Qaranooa Qardho.
29. G.le Jaamac Cali Maax — G. Bari, Gud. Deg. B. Beyla.
30. G.le Gaasim Xaaji Aadan Guuled — G. Nugaal, Gud. Gobolka Garoowe.
31. K.K. Xasan Maxamed — G. Nugaal, Dawladda Hoose Garoowe.
32. K. K. Yuusuf Faarax Samantar — G. Nuugal, Booliska Garoowe.
33. Bashir Cali Nuur — G. Nugaal, Bare Wax. Garoowe.

34. Axmed Olol Jaamac — G. Nugaal, Bare Wax Garoowe.
35. Maxamed Bin Maxamed Xaydar — G. Nugaal, Sh. Qaranka Garoowe.
36. Sahra Xaaji Maxamed Cusmaan — G. Nugaal, Bisha Cas.
37. Jaamac Gaas Macow — G. Nugaal, Gud. Degmada Eyl.
38. Axmed Xuseen Jaamac Cali — G. Nugaal, Sh. Qaranka Eyl.
39. G.le Axmed Cali Yuusuf — G. Nugaal, Gud. Deg. Laascaanood.
40. Xidigle Maxamed Cali Qoran — G. Nugaal, Tal. Sal. Booliska Laascaanood.
41. Dr. Maxamed Ciise Aadan — G. Nugaal, Caafimaadka Laascaanood.
42. Axmed Jaamac Dalmar — G. Nugaal, Dadweyne Laascaanood.
43. Maxamed Aadan Shirshore — G. Nugaal, Dadweyne Laascaanood.
44. Maxamed Cumar Abati Shooble — G. Nugaal, Sh. Qaranka Laascaanood.
45. Seynab Yaasiin Cabduraxmaan — G. Nugaal, Sh. Qaranka Laascaanood.
46. Ducaale Maxamed Xirsi — G. Nugaal, Waxbaraashada Taleex.
47. Dr. Caydaruus Muuse Aadan — G. Nugaal, Caafimaadka Taleex.
48. Dhamme Daahir Maxamed Sheekh — G. Mudug, Gud. Degmada Galkacayo.
49. Maxamed Cabdulle M.le — G. Mudug, Xooga Xarardheere..
50. 3 A.le 4216 Maxamed Warsame — G. Mudug, Xoogga Xarardere.
51. Dr. Maxamed Sh. Barkhad — G. Mudug, Caafimaadka Xarardheere.
52. Ruqiya Maxamed Kuusow — G. Mudug, Caafimaadka Xarardhere.
53. Cabdullahi Jaamac — G. Mudug, Waxbarashada Xarardhere.
54. Dhamme Cali Cumar Cabdi — G. Mudug, Xoogga Jeriiban.
55. Dr. Qaasim Cabdiraxman — G. Mudug, Caafimaadka Jeriiban.
56. M.le Ismaaciil Maxamuud Cabdulle — G. Mudug, Xoogga Jeriiban.
57. Xaliimo Maxamuud Mayow — G. Mudug, Sh. Qaranka Jeriiban.
58. Yuusuf Ibraahim Abuuraas — G. Galguudud. Dhusamareeb.
59. Dr. Cismaan Sh. Aadan — G. Galguduud, Caafimaad Ceelbuur.
60. Dr. Axmed Muxiddiin — G. Galguduud, Caafimaad Ceelbuur.
61. Faaduma Maxamed Faarax — G. Galguduud, Sh. Qar. Ceelbuur.
62. Cali Jimcaale Axmed — G. Galguduu d,Sh. Qaranka Ceelbuur.
63. Cabdulcasiis Sheekh Ibrahim — G. Galguduud, Sh. Qaranka Ceelb.
64. Cabdi Xuseen Axmed — G. Bakool, Sh. Qaranka Yeed.

Muqdisho, 30 Nofembar 1975.

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

**XEER L. 173 ee 30 Nofembar 1975.**
**Billad lacag ah ee Hawlkarnimo.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY Sida nafhuridda iyo habsamida leh ee Jaallayaasha hoos ku magacaaban ay u kuteen xilkii ka saarraa u gurmadkii Ummadda ee Gargaarka Abaarta, iyo kaalinta ay ka qaateen dhismaha guud ee Dalk Soomaaliyeed, iyagoo daacadnimadiida ku muujiyay afkaar hufan oo saameyneysa horukaca Bulshada Hantiwadaagga ah ee Soomaaliyada Cusub;

MARKUU ARKAY lagama maarnaan in ay tahay in Jaallayaashaas loo aqoonsado sharafta y Ummddooda ka mutaysteen;

MARKUU DHAGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad lacag ah oo hawlkarnimo Jaallayaasha:

1. Axmad Jaamac Cabdilleh «Jengeli» — Xoghayaha Guud ee Guddiga Gargaarka Abaarta;
2. Dhamme Dr. Axmad Dalmar Cabdiraxman — Madaxda Xerada Gargaarka Abaarta ee Ceynabo;
3. Dr. Salaad Faarax Guutaale — Takhtar ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka.

Muqdisho, 30 Nofembar 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

**XEER L. 174 ee 30 Nofembar 1975.**

**Billad Maar ah oo Hawlkarnimo: Gobolka Banaadir.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21kii Oktobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 18kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY Xilkaasnimada iyo waddaninimada qaayaha leh uu Gobolka Banaadir uga qayb qaatay gargaarkii loo fidinaaya Dadka Soomaaliyeed ee abaaraha ku tabaaloobay, gaar ahaan sida qiirada iyo xamaasada lahayd ee uu u tusaaleeyay Dadweynaha Gobolka deggan culeyska dhibaatada haysata dadka abaaruhu waxyeelleeyeen, taasoo keentay in ay si xilkasnimo leh ay ugu deeqeen walaalahood gargaar nooc-kastaba leh;

MARKUU ARKAY lagama maarmaan inay tahay in la xuso tallaabadaa weyn ee Gobolku uu qaaday;

MBARKUU DHEGEYSTAY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee MGSK;

WUXUU GUDDOOMIYAY

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay Gobolka Banaadir (Xamar) Billad Maar ah ee Hawlkrnimo.

Muqdisho, 30 Nofembar 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

**XEER L. 175 ee 27 Oktoobar 1975.**

**Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliye (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Dr. Xasan Warsame Cali — ku yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan — kuna fadhiya mq. 243.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad oo Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 oo soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Nofebar 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jenayo 1967;

ISAGA OO ARKA YArjigii uu keensaday Dr. Xasan Warsame Cali taarikh. du markay aheyd 23-5-1972 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan, kuna dhacaaya qaybta VI;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis haana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, lguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, L. 2-6 soona baxaday 18 Junyo 1972, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 2880, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 4°aad taarikhduna ahayd 3 Abrile 1973, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 87236 ee 5-4-1973, kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Dr. Xasan Warsame Cali uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 364,50, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO ARKAY Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 243, loona tiriyay Dr. Xasan Warsame Cali sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 9 Abrile 1973;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 18-10-1975, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggoladeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar l. 2880 ee 14-6-1972, laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xafadda Hodan, laguna siiyay xaashid lamb. 9951 taarikhdeeduna aheyd 15 Oktoobar 1975 ee Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed, la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente disponibilità) loona aqoonsaday Dr. Xasan Warsame Cali, dhul ku fadhiya mq. 243, kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan.

Muqdisho, 27 Oktoobar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

*WAAN ARAGNAT EE DIIWAANGELINAAY*

*Diiwaanka lamb. 1 boogga lamb. 29.*

*Muqdishro, 19 Nofembar 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

---

**XEER L. 176 ee 27 Oktoobar 1975.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente disponibinlità) Jaalle Dr. Xasan Warsame Cali — ku yaal Muqdisho, kuna fdhiya mq. 202,50.**

**Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Nuur Muddey Cali. ku yaal Muqdisho — kuna fadhiya mq. 202,50.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23 Mayo 1961;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Nofembar 1973;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensadayn Nur Muddey Cali iyo Mumina Madow taarikhdu markay aheyd 24-7-1963 kuna weydiisteen dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan, kuna dhacaaya qaybta V;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qaroy Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, Suppl. L. 6-11 soona baxday 25 Nofembar 1963, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 10337 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 337°aad taarikhduna aheyd 10 Agosto 1964 kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 6762 taas oo beddeshay midii hore lambarkeedu ahaa 10337 laguna aqoonsaday fadhigii 27°aad ee Guddiga dhisemaha Dowladda Hoose, taarikh markay ahayd 17 Disembar 1968, kuna saabsaneed dhismo Guri mq. 202,50;

ISAGA OO ARKAY Bolletada lamb. 31023 ee 23-11-1964, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Nur Muddey Cali iyo Mumina Madow bixiyeen lacag dhan Sh. So. 810, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 405, loona tiriyay Nur Muddey Cali iyo Mumina Madow sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 15 Nofembar 1965;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 10.397 Reb. taarikh. 14-10-1968 lagu diiwaan geliyay Xamar 14-10-1968 lamb. 766 qoraal Dowladeed Buugga 18 oo ah caddeynta Notaayada Micheel Joseph Mariano taas oo Mumina Maxamed Yebero (Madow) ka gaday kuna wareejisay Dr. Xasan Warsame Cali wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 202,50, kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismasa iyo Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 18-10-1975, taas oo caddeynysa in Naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar l. 6762 ee 22-10-1968 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagganaashada Guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan — laguna siiyay xaashid lamb. 9198 taarikhdiisuna ahayd 15 Oktoobar 1975 ee Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e consegunete libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo aasraya;

XEER

B — Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay loona aqoonsaday Dr. Xasan Warsame Cali dhul ku fadhiya mq. 202,50, kuna yaal Muqdisho — xaafadda Hodan.

T — Waxaa cad dhul Dowladdeed la siiyay, Nuur Mudeey Cali kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq. 022,50.

Muqdisho, 27 Oktoobar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

---

**XEER L. 177 ee 6 Disembar 1975.**
**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

**BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA**

**XEER üIDAAMIYA LAMBAR 80 EE 6 Disembar 1975**

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1974, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1974, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha addunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddammada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo Ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 192 ee 06-10-1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofembar, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 06-12-1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Iibsashada oo Sh. So. ah | Heerka Gadidda oo Sh. So. ah |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 12.6632 | 12.9164 |
| DM. | 1.00 | 2.3729 | 2.4203 |
| Lit. | 109.87 | 1.0000 | —— |
| Lit. | 107.67 | —— | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1.00 | 1.3982 | 1.4262 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.3261 | 2.3726 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 6 Disembar 1975.

SACIID MAXAMED CALI — *Agaasimaha Guud*

CUMAR AXMED CUMAR — *Guddoomiyaha*

---

**XEER 178 ee 27 Oktoobar 1975.**

**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

**BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA**

**XEE NIDAAMIYE LAMABZAR 79 EE 27 Oktobar 1975**

---

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1974, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1974, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood saanaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loeguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha addunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddemmada ku jara Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 191 ee 27-10-1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofembar, 1968, uu dhigaye.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 27-10-1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Iibsashada oo Sh. So. ah | Heerka Gadidda oo Sh. So. ah |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 12.7911 | 13.0469 |
| DM. | 1.00 | 2.4312 | 2.4798 |
| Lit. | 108.35 | 1.0000 | —— |
| Lit. | 106.19 | —— | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1.00 | 1.4224 | 1.4508 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.3544 | 2.4015 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 27 Oktoobar, 1975.

SACIID MAXAMED CALI — *Agaasimaha Guud*

CUMAR AXMED CUMAR — *Guddoomiyaha*

# BOGGA SEDDAXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OEGYSIIS *W*IXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xareed Maxamed, u usoo qortay arj iDhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu 23-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 27x13,50 kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Axmed Cabdulle Guuleed.

Koofur waxaa ka xiga: Muxiddiin Casiir Axmed.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddada Hawl-Wadaag.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

(294)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Daahir Yuusuf, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 22-9-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 6° Km., oo leh qiyaas Rektangolaar 28x25, kuna fadhiya 700 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lambar 54 K.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lambar 56 K.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(295)*

DOWLADDA HOOSE EE DEGMADA DHUUSA MAREB

*N A A D A   D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degaan degaadatan Dhuusa Mareeb in taariikhdu markay ahayd 28-4-1975, uu Jaalle Yuusuf Nuure Diini sida xeerku yahay ina soo weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmadatan Dhusa Mareeb Xaafadda Dayax ama jidka hore ee Xamar Gaalkacyo dhulkaasoo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 31x15 kuna fadhiya 465 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Dhusa Mareeb 28 Abrile 1975.

Waqooyi waxaa ka xiga: Jaalle Aadan Xaaji Nuur.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jaalle Aadan Xaaji Nuur.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Sidaas awgeed qof allaale qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadiisa Xafiiska Dawladda Hoose ee Degmadatan Dhusa Mareeb, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood ah laga bilaabo maalinta ay taariikhdu tahay 28-4-1975, oo lagu soo dhejiyay looxa ogeysiisyada ee Xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmatan Dhusa Mareeb ilaa maalinta taariikhdu tahay

27ka May 1975.

Guddoomiyaha Degmada Dh. Mareeb
*Jaalle Maxamed Cabdulle Cali (Garjeek)*

*(296)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Deble Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5-9-1966, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 24x15, kuna fadhiya 360 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo bixi doonta.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Bari waxaa ka xiaga: Waddada Hawl-Wadaag.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(297)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Axmed Muuddey,u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 11-10-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektangolaar ah 23,40x13,50 kuna fadhiya 315,90 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.

Koofur waxaa ka xiga: Xaliima Axmed.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Daahir Ibrahim.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(298)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Nuur Xasan iyo Maxamed Abuukar Abooke, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9-3-1960, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas rektangolaar 40x20, kuna fadhiya 800 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(299)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Aadan Xersi Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 11-11-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar 40x30; kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Bari waxaa ka xiga: Waddada Qaranka.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(300)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maaxmed Abiikar Sheekh, u usoo qortay qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii tqriikhdu ahayd 20-11-75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30x20 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa kaxiga: Waddo caadi ah.

Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Cali.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo Caadi ah.

Bari waxaa ka xiga Xaliima Abuukarii

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(301)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Iisha Sheekh Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10-9-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas afar gees siman 20x20, kuna fadhiya 400 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Lotka lamb. 3.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Lotka lamb. 7.

Bari waxaa ka xiga: Lotka lamb. 9.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 7 Disembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(302)*

**MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE**

## GARSOORAHA MAXKAMADDA

HADDII UU ARKAY Arji uu soo qortay Jaalle Nuur Sahal Cabdi, 21 jir ah oo ku taariikheysan 15-11-1975, kaasoo ku weydiistay in loo jadiidiyo libreetto ka lumay lamb. yahay 2063 oo ku qoran tahay lacag tirsigeedu gaaraayo 170 (boqol iyo todotaan) shilin;

HADDII UU ARKAY Xeerka Lambarkiisu yahay 2 soona baxay 9-9-1965;

HADDII UU HUBSADAY In ay run ahay lumida libreetaha kor ku tilmaaman yahay:

## WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo libreetto kale (duplicato) Jaalle Nuur Sahal Cabdi 15 maalmood laga billaabo maalintii lagu qoro faafinta rasmiga ah.

Marka, 20Nofembar 1975.

GARSOORE
*Axmed Ibrahim Maxamed*

*(303)*